

Xeerka Xuquuqda Macaaiisha Adeeg Daryeel Guri Bixiyayaasha Liisanka La Siiyey ee Minnesota

Bayaanka Xuquuqaha

Macmiilka hela adeegyo daryeel guri bulshada wuxuu xaq u leeyahay:

1. Inuu helo macluumaad qoran, luuqad waadixa ah, oo ku saabsan xuquuqda ka hor intaanu helin adeegyada, oo ay ka mid yihiin waxa la sameynayo hadii la jabiyo xuquuqdan.
2. Hel daryeel iyo adeegyo iyadoo loo eegayo qorshe ku haboon iyo waqti ku sargo'an, iyadoo ku xiran daryeel caafimaad oo la aqbalay, heerar caafimaad ama kalkaalnimo iyo xarumaha daryeelka dadka, uga qayb qaadashada si firfircoon horumarintiisa, wax kabadalkiisa, iyo qiimaynta qorshaha iyo adeegyada.
3. In loo sheego ka hor intaanu helin adeegyada nooca iyo dhaqanka shaqaalaha bixinaya adeegyada, inta jeer ee booqasho la qorsheeyey in la sameeyo, akhtiyaarada kale ee diyaarka u ah waxka qabashada baahiyaha daryeelka guriga, iyo cawaaqibta diidida adeegyadan.
4. In loo horey uu ugu sheego isbadal kasta oo lagu taliyey daryeel bixiyuhu qorshaha adeega oo uu ka qaado door muuqda go'aamada isbadalada qorshaha adeega.
5. Diido adeegyada ama daaweynta
6. Ogow, ka hor inta aadan helin adeegyada ama inta lagu gudo jiro booqashada koowaad, Xadidaadaha ku yimaada adeegyada bixiyaha daryeelka guri.
7. In loo sheego ka hor adeegyada intaan la bilaabin waxa daryeel bixiyuhu ka qaadanayo adeegyada; lacag intee inleeg ayaa laga rajeyn karaa caymiska caafimaad, barnaamijyada dadweynaha, ama ilaha kale ee la yaqaan; iyo lacagta uu masuul ka noqon karo bixinteeda macmiilku.
8. Ogow inay jiri karaan adeegyo kale oo laga heli karo bulshada, oo ay ku jiraan adeegyada daryeelka guriga iyo bixiyayaashooda, oo ogow halka laga helo macluumaad ku saabsan adeegyadan.
9. Si xora uga doora daryeel bixiyayaasha diyaarka ah iyo si aad u badeshid daryeel bixiyayaasha ka dib adeegyadu intaanay bilaabmin, xaduudka caymiska caafimaadka, daryeelka caymiska mudada dheer, caawimada caafimaad, iyo barnaamijyada caafimaad ee kale ama barnaamijyada dadweynaha.
10. Lahaado xog shakhsi, maaliyadeed, iyo caafimaad oo la asturay, laguna waaniyey siyaasadaha iyo nidaamyada adeeg bixiyaha ee khuseeya sheegista xogta noocan ah.
11. Helitaanka kaydka iyo xogta qoran ee macmiilka ee kaydkaasi iyadoo la raacayo Xeerka Kaydka Caafimaadka Minnesota, Sharciga Minnesota, Qeybtiisa 144.291 ilaa 144.298.
12. Waxa kuu adeegi doona dad si sax ah loo tababaray oo carbisan inay gutaan waajibadkooda.
13. Waxay kuula dhaqmi doonan si xushmad iyo qadarin leh, iyadoo xushmad loo muujinayo hantida macmiilka.
14. Ka xor noqdaan xadgudub jidheed iyo mid afeedba, dayacnaan, ka faa'idaysi maaliyadeed, iyo dhamaan qaababka si xun ula dhaqmida ee lagu daboolay Xeerka Dadka Waaweyn ee Jilicdasan iyo Xeerka Dadka Yaryar.

Xeerka Xuquuqda Macaamiisha Adeeg Daryeel Guri Bixiyayaasha
Liisanka La Siiyey ee Minnesota

15. Ogeysiis macquul ah oo horey loogu sheego isbadalada adeegyada ama lacagta.
16. Ogow sababta adeeg bixiyuhu u tirtiro adeegyada.
17. Ugu yaraan toban maalmood kahor ayuu ogeysiin doona joojinta adeega bixiyaha daryeelka gurigu. Qodobkan looma adeegsanayo goobaha:
 - Macmiilka ku lugleh fal badalaya heshiiska qorshaha adeega daryeel bixiyaha guriga;
 - Macmiilka, qofka la nool macmiilka, ama kuwa kale oo abuuraya deegaan shaqo oo aan amaan ahayn ama xadgudub u leh qofka bixinaya adeegyada daryeelka guriga; ama
 - Xaaladda degdegga ah ama isbeddel weyn oo ku yimaadda xaaladda macmiilka ayaa waxa ka dhashay baahiyo adeeg oo ka sarreeya qorshaha adeegga hadda jira oo daryeel bixiyaha gurigu aanu buuxin karin.
18. Wareejin isku-dubbaridan markii isbedel ku dhaco bixiyaha adeegyada.
19. U cabatid shaqaalaha ama kuwa kale ee dookha macmiilka ee adeegyada la bixiyey, ama agu guul daraystay in la bixiyo, iyo akhlaaq darada iyo ixtiraam a'aan lagula kaco macmiilka ama hantida macmiilka, iyo xuquuqda lagu talinayo isbadalada siyaasada iyo adeegyada, kana xor ah aar goosi, oo ay ku jiraan ku hanjabista joojinta adeegyada.
20. Barto sida lola xidhiidho shakhsiga ku lugleh bixinta daryeelka guriga kana masuulka ah wax ka qabashada dhibaatooyinka uuna helo baadhista daryeel bixiyaha guriga iyo isku dayga xalinta walaaca ama cabashada.
21. Barto magaca iyo ciwaanka gobolka ama wadanka wakaalada si uu ugala xidhiidho wixii macluumaad ama caawimo dheeriya.
22. U xaqiijiyo xuquuqahan shakhsiyan, ama uu u xaqiijiyo wakiilka macmiilka ama qof kale oo matalaya macmiilka, bilaa aargoosi.
23. Ku rid aaladda kormeerka elektiroonigga ah goobta macmiilka ama halka uu degan yahay iyada oo la waafajinayo shuruudaha gobolka.

Waxaad dooran kartaa inaad kala hadasho wixii walaac ah adeeg bixiyaha. Xasuusin ahaan, adeeg bixiyayaasha waxaa looga baahan yahay inay ka shaqeeyaan sidii loo hubin lahaa xuquuqahaaga iyo in shuruudaha loo raacay. Marka adeeg bixiyayaashu ku xadgudbaan xuquuqaha qaybtan, waxaa ka dhalanaya ganaaxyo iyo talaabooyin ka dhan ah liisaanka.

Adeeg bixiyayaashu waa in ay sameeyaan dhamaan kuwan soo socda:

- Dhiirrigeli oo gacan ka geysa fulinta ugu habboon ee xuquuqdan.
- Sii magacyada iyo lambarrada taleefanka shaqsiyaadka iyo ururada sameeya u doodista iyo adeegyada sharciga ee loogu talagalay macaamiisha iyo deganeyaasha doonaya inay caddeeyaan xuquuqdooda.
- Samee dadaal kasta oo aad ku caawinayso macaamiisha ama helitaanka macluumaadka deggeneyaasha ee ku saabsan haddii caymiska dadka waa weyn ee dawlada dhexe, kaalmada caafimaad, barnaamijyada kale ee caafimaad, ama barnaamijyada dadweynaha ay bixin doonaan lacagha adeegyada.
- U samee fududeyn macquul ah dadka naafada ka ah isgaarsiinta, ama kuwa ku hadla luqad aan aheyn Ingiriis.
- Sii dhammaan macluumaadka iyo ogeysiisyada ku qoran luuqad waadax ah iyo shuruudaha macmiilka ama qofka degani uu fahmi karo.

Xeerka Xuquuqda Macaamiisha Adeeg Daryeel Guri Bixiyayaasha
Liisanka La Siiyey ee Minnesota

Ma jiro adeeg bixiye u baahan kara ama ka codsan kara macmiil ama degane inuu ka tanaasulo mid ka mid ah xuquuqaha ku taxan qaybtan wakhti kasta ama sabab kasta ha noqotee, oo ay kujirto shuruud ah bilaabida adeegyada ama galida heshiiska caawimaada nolosha.

Tarjumida iyo Dhaqangelinta Xuquuqaha.

Xuquuqahan waxaa loo aasaasay iyadoo la eegayo faa'idada macaamiisha hela adeegyada daryeelka guriga. Dhammaan bixiyeyaasha daryeelka guriga waa inay u hoggaansamaan xuquuqahaan. Gudoomiyaha ayaa fulin doona tan. Bixiyaha daryeelka gurigu ma weydiisan karo ama umagama baahan karo macmiil inuu ka tanaasulo mid ka mid ah xuquuqahan oo uu shuruud uga dhigo helitaanka adeegyada. Bayaankaan xuquuquhu ma beddeleyo mana yareynayo xuquuqaha kale iyo madax-bannaanida jiri kara marka loo eego macaamiisha heleysa adeegyada daryeelka guriga, dadka bixiya adeegyada daryeelka guriga, ama bixiyeyaasha daryeelka guriga ruqsada haysta.

Macluumaadka

Waxaad kala xiriiri kartaa daryeel bixiyaha ruqsada leh sidan hoos ku xusan:

Magaca qofka haysta liisanka: _____

Telefoon: _____

Iimayl: _____

Cinwaan: _____

Magaca iyo jagada qofka dhibaatooyinka ama cabashooyinka loo gudbin karo: _____

Gudbi xadgudub la tuhunsan yahay, dayacaad ama dhiigmiirasho lacageed oo qof weyn oo nugul ah:

XARUNTA WARBIKINTA XADGUDUBKA DADKA WAAWEYN EE MINNESOTA (MAARC)

Taleefan Lambar: 1-844-880-1574

Wixii macluumaad ee dheeri ah:

[Ilaalinta dadka waaweyn ee jilicsan iyo ku xadgudubka](https://mn.gov/dhs/adult-protection/)

(<https://mn.gov/dhs/adult-protection/>)

Dhamaan cabashooyinka kale ee aan looga shakisanayn xadgudub, dayacaad ama ka faa'iideysiga dhaqaale ee qof weyn oo nugul, fadlan la xiriir Xafiiska Cabashooyinka Xarunta Caafimaadka ee Waaxda Caafimaadka ee Minnesota:

WAAXDA CAAFIMAADKA MINNESOSTA

XAFIISKA CABASHOYINKA CAAFIMAADKA

PO Box 64970

St. Paul, Minnesota 55164-0970

Taleefan: 651-201-4201 ama 1-800-369-7994

Fax: 651-281-9796

health.ohfc-complaints@state.mn.us Xafiiska Cabashooyinka Caafimaadka

(<https://www.health.state.mn.us/facilities/regulation/ohfc/index.html>)

Xeerka Xuquuqda Macaaiisha Adeeg Daryeel Guri Bixiyayaasha
Liisanka La Siiyey ee Minnesota

Si aad u codsatid adeegyada taageerada, fadlan la xidhiidh Xafiiska Masuulka Cabashooyinka ee Daryeelka Mudada-Dheer ama Xafiiska Masuulka Cabashooyinka ee Caafimaadka Maskaxda iyo Horumarinta Naafada:

XAFIISKA MASUULKA CABASHOYINKA

DARYEELKA MUDADA-DHEER

PO Box 64971

St. Paul, MN 55164-0971

1-800-657-3591 or 651-431-2555

MBA.OOLTC@state.mn.us

[Masuulka Cabashooyinka Daryeelka Mudada-Dheer](http://www.mnaging.org/Advocate/OLTC.aspx)

(<http://www.mnaging.org/Advocate/OLTC.aspx>)

XAFIISKA MASUULKA CABASHOYINKA CAAFIMAADKA MASKAXDA IYO HORUMARINTA
NAAFADA

121 7th Place

East Metro Square Building

St. Paul, MN 55101-2117

1-800-657-3506 or 651-757-1800

Ombudsman.mhdd@state.mn.us

[Office of Ombudsman for Mental Health and Developmental](https://mn.gov/omhdd/)

[Disabilities \(https://mn.gov/omhdd/\)](https://mn.gov/omhdd/)

XARUNTA CAAWINTA QANUUNKA/SHARCIGA NAAFADA EE MINNESOTA

(Nidaamyada Ilaalinta iyo Taageerada)

430 First Avenue North, Suite 300

Minneapolis, MN 55401-1780

1-800-292-4150

mndlc@mylegalaid.org

[Caawimada qanuunka \(http://mylegalaid.org/\)](http://mylegalaid.org/)

QEYBTA ADEEGYADA ARIMAHA BULSHADA MINNESOTA

(Arimaha wax isdaba marinta caawimada caafimaad iyo xadgudubka lacag bixinta)

Adeegyada dabo galka iyo dib u Eegista Sharafta

PO Box 64982

St Paul, MN 55164-0982

1-800-657-3750 or 651-431-2650

DHS.SIRS@state.mn.us

KHADKA XIDHIIDHKA

(Xarunta Khayraadka D'ada iyo Naafadada/Wakaalada Da'da) Minnesota Board on Aging

PO Box 64976

St. Paul, MN 55155

1-800-333-2433

senior.linkage@state.mn.us

[Khadka Xidhiidhka \(www.SeniorLinkageLine.com\)](http://www.SeniorLinkageLine.com)

Xeerka Xuquuqda Macaamiisha Adeeg Daryeel Guri Bixiyayaasha
Liisanka La Siiyey ee Minnesota

Su'aalaha guud, fadlan la xidhiidh:

Qeybta Caafimaadka Minnesota Laanta Sharci-fulinta Caafimaadka
85 E. 7th Place
PO Box 64970
St. Paul, MN 55164-0970
651-201-4101
health.fpc-web@health.state.mn.us
[Qeybta Caafimaadk Minnesota \(www.health.state.mn.us\)](http://www.health.state.mn.us)

Waxa isticmaalaya adeeg bixiyayaasha adeegyada Daryeelka Guriga marka laga reeco liisan bixinta sharciga Minnesota 144A.471, Qeybtiisa 1. Xuquuqdani waxay khuseeyan macaamiisha ka helaaya adeegyada daryeel guri daryeel bixiyayaal liisan haysta.

Daryeel bixiyaha gurigu wuxuu siin doonaa macmiilka ama wakiilka macmiilka ogeysiis qoraala oo xuquuq ah ka hor taariikhda adeegyada la siisyey macmiilka. Daryeel bixiyuhu wuxuu sameyn doonaa dhamaan dadaalada macquulka ah sii uu u siiyo ogeysiiska xuquuqda macmiilka ama wakiilka macmiilka kaas oo ku qoran luuqada macmiilku ama wakiilka macmiilku fahmi karo.

Waaxda Caafimaadka Minnesota

Qeybta Sharci-dejinta Caafimaadka
P.O. Box 64900
St. Paul, Minnesota 55164-0900
651-201-4101
health.fpc-licensing@state.mn.us

Dib loo eegay Noofambar 2019

Si aad ugu heshid qaab kale macluumaadkan, wac: 651-201-4101.